

# Agabka Bulshadda Gobolka New York

Isha Hagaida ee Dadka Muhaajiriinta Reer New York  
Maarso/Abril 2022



Isbahaysaiga Laanta Socdaalka New York waxay samaysay agan si loo siiyo ilo xubnaha bulshadda iyo shuraakadayada iyo gaashaan buurtayada la shaqeeya iyaga. Buugyarah si joogto ah ayaa loo cusboonaysiiyaa iyadoo lagu salaynayo beddelka sharciyada iyo xeerarka.

Narkii ugu dambaysay ee xogta la  
cusbooneysiyyay waxay ahayd: 03.21.2022

## **Tusmadda**

- Caafimaadka **3**
- Socdaalka **5**
- Waxbarashadda **7**
- Dimuqraadiyada **9**
- Dhaqaalaha **10**
- Garo Xuquuqdaada **11**
- Dembiyada Nacaybka ah **12**
- Ilaha NYS **13**

# Caafimaadka 1/2

## Cusboonaysiinta Arrimaha COVID-19

- Laga soo bilaabo Febarwari 10, 2022, shuruudda ahayd af-saabka ama-tallaalka marka la joogo meheradda dhexdeeda ayaa dul qaaday gobolka oo dhan. Waxay ahaan doontaa ikhtiyaar meheradha, dawladaha hoose, iyo kaawntiyada.
  - Ka dalbo agabyada ka baaritaanka bilaashka ah barta [COVIDtests.gov](#)
- Af-saabiyada ayaa wali looga baahan doonaa isbitaalalda, guryaha dadka lagu xannaaneeyo, hoy gabaayada, gaadiidka, iyo meelaha kale iyada oo la raacayo qawaaniinta federaalka.
- Dhammaan dadka socdaalaya, gudaha iyo dalka dibaddiisaba, waa inay ku sii wadaan raacitaanka dhammaantood shuruudaha socdaalka ee CDC: [cdc.gov/coronavirus/2019-ncov/travelers](#).
- Laga soo bilaabo Disambar 27, 2021, dhammaan shaqaalah waaxda meheradaha gaarka loo leeyahay ee magaalada New York ayay ahayd in ay heleen ugu yaraan hal qiyaas oo tallaalka COVID-19 ah. Wixii maclummaad dheeraad ah ee ku saabsan ujeeddadan, booqo [nyc.gov/vaxtowork](#).

## Hel agab ka baaritan COVID-19 oo guriga oo bilaash ah

- Reer kasta oo ku nool Mareykanku wuxuu uqalmaa inuu helo 4 agab ka baaritaanno COVID-19 oo guriga ah oo bilaash ah, oo ay idii keento USPS.
  - Ka dalbo agabyada ka baaritaanka bilaashka ah barta [COVIDtests.gov](#)
- Laga bilaabo 15ka Janaayo, dadka intooda badan ee leh qorshe caafimaad ayaa tagi kara onlayn, ama farmashiye ama dukaanka si ay ugu iibsadaan guriga dhexdiisa baaritaanada COVID-19 (ilaa 8 bishii) lacag la'aan, ha ahaato lacag u celin ama lacag la'aan iyagoo isticmaala caymiskooda.
- Si aad u hesho maclummaad dheeraad ah, booqo [cms.gov/how-to-get-your-at-home-OTC-COVID-19-test-for-free](#)

## Maanta Is Tallaal

- Waligeed sida hadda oo kale u fudaan in laga helo tallaalka COVID-19 gudaha Gobolka New York. Qof kasta oo jira 5 ama ka weyn ayaa u qalma tallaalka. Qiyaasaha xoojinta ayaa diyaar u ah qof kasta oo jira d'ada 12 iyo inta ka wayn.
- Tallaalka cudurka COVID-19 waa BILAASH iyadoon loo eegeyn xaaladdaada soo galootinimo ama haddii aad caymis caafimaad aad qabto iyo in kale.
- Tallaallada ayaa si baahsan ayaa waxaa looga helaa farmashiyeysa, waaxyada caafimaadka ee maxalliga ah, rugaha caafimaadka, Xarumaha Caafimaadka ee Federaal ahaan u Qalma, iyo meelo kale oo Gobolka New York ku baahsan.
  - Booqo [Vaccines.gov](#), ZIP koodkaaga farriin qoraal ahaan ku soo dir [438829](#), ama wac [1-800-232-0233](#) (TTY 888-720-7489) si aad ballan uga samaysato meel adiga kuu dhowl.
  - Ballan ka samayso goobaha tallaalka ballaaran ee Gobolka New York ee ah [ny.gov/vaccine](#)
  - Waaxyo caafimaad oo badan oo degmada ka jira ayaa fidhiya rugo tallaal oo la iska tago oo aan ballan loo baahnayn ama guriga lagugu imaanayo. Ka hel maclummaad la xiriirka ee waaxda caafimaadka ee maxaliga [nysacho.org/directory](#).



# Caafimaadka <sup>2/2</sup>



## La dagaallama faafka

- Is tallaal oo xoojiyaha (booster) qaado.
  - Xaalad kasta oo COVID-19 aya u horseedi kartaa calaamado daran, oo la isku dhigi karaa isbitaalka dhigid oo yeelan karta saameyn caafimaad oo muddo-dheer ah. Dadka aan la tallaalin waxay aad u badan tahay inay yeeshaan jirro aad u daran.
- Gasho af-saab (maaskaro)
  - Tixgeli inaad gashato af-saab wajiga markaad joogto gudaha goobaha dadwaynaha ee ah meelaha aan la garanayn heerka tallaalka.
  - Sare ugu qaad af-saabyo tayo ka sareysa leh, oo ay ku jiraan KN95, KF94, N95, ama af-saab maro ah oo kor saaran af-saabka rugtacaafimaad (surgical mask).
  - Dadka halista sare ugu jira xanuunnada daran, ee ka wayn 65 jir, ama aan la tallaalin ayaa inta badan waxtar ka heli doona isku dul lakabkan difaaca ah.
- Ha lagaa tijaabiyo.
  - Iska baar haddii aad leedahay astaamaha ama aad dhawaan aad u feydsantay. Dadka aan la tallaalin waa in marar ka sii badan laga tijaabiyo.
- Guriga joog haddii aad bukto ama aad dhawaan aad cudurka u feydsantay.
  - Raac dhammaan hagitaanka gaar u joogga iyo karantiilka, oo ay ku jirto gashiga maaskaro af-saabka. Cudurka COVID-19 aad ayaa la isqabadsiyyaa. Waad faafin kartaa cudurka COVID-19 xataa haddii aadan lahayn astaamaha.
- Gacmaha iska dhaq
  - Gacmahaaga ku dhaq marar badan saabuun iyo biyo ugu yaraan 20 sekan ama isticmaal gacan nadiifiye jermiska ka dila.



## Xeerka NY HERO

- Xeerka Caafimaadka iyo Xuquuqda Aasaasiga ah ee New York waxaa la saxiixay oo sharci noqday 5ta bisha Maajo, 2021. Wuxuu Waaxda Shaqada ee Gobolka New York uga baahan yahay inay abuurto Qorshayaasha Bandhigga Cudurrada Hawada ee Model-ka si shaqaalaha looga ilaaliyo inuu soo gaaro cudurrada sida cudurka COVID-19.
- Taariikhda markay ahayd 6da bisha Sebtember, 2021, Guddoomiye Hochul waxay ku dhawaaqday Xeerka HERO oo ah in cudurka COVID-19 yahay cudur faafa oo hawada ku hoos ku dhex jira. Magacaabistan waxay u baahan tahay in dhammaan shirkaddaha loo shaqeeyo/loo-shaqeeyayaasha waa inay hirgeliyaan qorshayaasha badbaadada goobta shaqada.
  - Qorshayaasha ay qaateen loo-shaqeeyayaashu waa inay wax ka qabtaan tallaabooyin badan oo badbaado ah, balse kuma koobna oo kaliya: baaritaannada caafimaadka shaqaalaha, maaskarada iyo shuruudaha masaafko ka fogaanshaha bulshada, nadaafadda goobta shaqada, borotokoolka nadiifinta goobta shaqada, qawaaniinta karantiil, iyo dhisidda tikniyoolajiyadda hawada.
  - Loo-shaqeeyayaasha waxaa laga rabaa inay qorshahooda badbaadada shaqada u qaybiyaan dhammaan shaqaalaha kuna dhajiyaan meel laga arki oo caan ah goob kasta oo shaqada ah.
  - Intaa waxaa dheer, sharcigu wuxuu shaqaalaha ka ilaaliyaa aargoosi oo loo-shaqeeyaha waa inay raacaan shuruudaha qorshayaashan, soo sheegaan tabashooyinka ku saabsan hirgelinta sharciga ee loo -shaqeeyaha, ama diido inay shaqeeyaan.
- Dhammaan loo -shaqeeyayaasha iyo shaqaalaha gaarka ah way cayiman yihiin.
- Laga bilaabo 1da Noofeeber, shaqaalaha gaarka ah (ka shaqeeya shirkadaha leh 10 ama ka badan) waa in loo oggolaadaa inay abuuraan guddiyo shaqaale si ay wax uga qabtaan siyaasad kasta oo caafimaadka iyo badbaadada goobta shaqada ah, ma aha oo keliya arrimaha khuseeya COVID-19.
- Qorshayaasha moodeelka iyo wixii ka soo cusboonaada hirgelinta Xeerka HERO waxaa laga heli karaa [dol.ny.gov/ny-hero-act](https://dol.ny.gov/ny-hero-act).

# Socdaalka 1/2



## Ilaha loogu talagalay muhaajirinta Hayshaanka

- Markay ahayd 22ka bisha Diseembar, Xafiiska Duqa Magaalada New York ee Xafiiska Gudoomiyaha Arrimaha Soo Haajirayaasha ayaa ku dhawaqaqay inay Magaaladu bixin doonto \$1.5 milyan oo fuunday ah si loogu caawiyu dadka reer Haiti ee dhawaanta yimid si ay marin ugu helitaan gargaar shariyeedka arrimaha imigreeshinka iyo adeegyada bulshada.
- Si aad u hesho liiska ilaha adeegyada taageerada bulshada Hayshiyan ee magaalada New York, booqo [on.nyc.gov/3y6bo2Z](https://on.nyc.gov/3y6bo2Z)
  - Ilahan waxaa lagu heli karaa luqado badan xaga [on.nyc.gov/334dJQx](https://on.nyc.gov/334dJQx)

## Ilaha loogu talagalay qaxootiga reer Afgaanistaan iyo kuwa tijaabada ku jira

- Taariikhda markay ahad 30ka September, Madaxweyne Biden waxa uu saxiixay sharci sii socda oo ay ku jiraan qodobbo lagu taageerayo qaxootiga Afgaanistaan iyo sii-daynta sharafeed, oo ay ku jiraan:
  - Ka dhigista "sii-daynta sharafeed bini'aadantinimo" ee Afgaanistaan u qalma inay helaan adeegyada iyo manfacyda dib u dejinta qaxootiga, sida soo dhawaynta iyo meelaynta taageerada iyo gargaarka cuntada
  - In dowladda federaliya looga baahan yahay inay dedejiso tiixgelinta codsiyada magangelyo ee sii-daynta sharafeed ee reer Afgaanistaan
  - Ka dhigista sii-daynta sharafeed ee Afgaanistaan ee u qalma REAL ID shatiga darawalnimada iyo kaararka aqoonsiga
- Ilaha Dowladda Federaalka:
  - Hagidda dadweynaha USCIS ee loogu talagaly reer Afgaanistaan: [uscis.gov/humanitarian/information-for-afghans](https://uscis.gov/humanitarian/information-for-afghans)
  - "Maclummaadka Shaqada ee Ku Saabsan Dadka Haysta Fiisaha Gaarka Ah ee Muhaajirka Reer Afgaanistaan iyo La Sii-daayeyaasha" ee ah Afka Ingiriisiga, Dari, iyo Pashto: [justice.gov/crt/worker-information](https://justice.gov/crt/worker-information)
  - Ilaha Kaalmada Reer Afgaanistaan ee dhammaan dawladda dhexe oo uu soo diyaariyay Xafiiska Dib-u-dejinta Qaxootiga: [acf.hhs.gov/orr/programs/refugees/afghan-assistance-resources](https://acf.hhs.gov/orr/programs/refugees/afghan-assistance-resources)

- Ilaha dib-u-dejinta:
  - Gobolka New York – I-ARC Mashruuca Dib-u-dejinta Afgaanistaan: [immigrantarc.org/afghanistan](https://immigrantarc.org/afghanistan)
  - Magaalada New York – oo ay ku jirto khariidadda adeegyada magaalada ee lagu heli karo Dari iyo Pashto: [nyc.gov/afghanistanresources](https://nyc.gov/afghanistanresources)
  - Galbeedka New York – Buffalo United oo loogu talagalay Daadguraynta reer Afgaanistaan: [wnyrac.org](https://wnyrac.org)
  - Albany/Caasimada gobolka – Liiska Ilaha Cornell Afgaanistan: [bit.ly/3CwfFxy](https://bit.ly/3CwfFxy)
- Foomka Xog Ururinta Kowaad ee Xuquuqda Aadanaha ee lagu ogaanayo dadka u baahan in laga soo daadgureeyo Afgaanistaan: [humanrightsfirst.org/afghan-evacuation](https://humanrightsfirst.org/afghan-evacuation)

## Codsiyada bilowga ah ee DACA waa la hakiyay

- Taariikhdu markay ahayd 16ka bisha Luulyo, 2021, Garsoore maxkamad federaali ee Texas Garsoore Hanen ayaa soo saaray go'aan ah in DACA aysan ahayn barnaamij sharci ah. Go'aankaasi wuxuu DHS ka hor istaagayaa inay ansixiso arjiyada cusub ee DACA ee ugu horreysa. Ilaa iyo hadda, DHS waxay sii wadi kartaa inay oggolaato arjiyada cusboonaysiinta DACA.
  - Haddii hadda aad haysato DACA, sharcigaaga weli waa ansax.
  - Haddii DACA -gaagu dhowaan uu dhoco, hadda cusboonaysii!
  - Haddii aad markii ugu horeysay u gudbisay USCIS codsi DACA ah oo aan weli la aqbalin, codsigaas waa la joojin doonaa. La ma socod siin doono ilaa ogeysiis dambe.
- Dacwad ayaa socota, sidaa darteed waxaa suurtogal ah in isbeddello dheeraad ah lagu sameeyo barnaamijka.

## Xallinta ficiinka dacwo ee cusub ayaa ka hor istaagi doonta ICE inay ku kacdo dad xiritaanno sharci darro ah

- Maxkamad federaal ah oo ku taal gobolka Illinois ayaa dhawaan ansixisay xallinta kama dambaysta ah ee kiis ka hortagaya Socdaalka iyo Dhaqangelinta Kastamyadu (ICE) inay ku kacaan xiritaanno sharci-darro ah.
- Xukunka gar-qaadkii Castanon Nava v. ICE waxa uu ku amri doonaa wakaaladdu inay qaadato xeerar cusub oo la xiriira xiritaannada waaran la'aanta ah, dib u tababbaritaanka saraakiisheeda, iyo in dadka laga sii daayo xabsiga haddii la jebiyoarrinta xalinta. Heshiska xalintu waa mid heer qaran qabanaya.

# Socdaalka 2/2



## Arrimo Cusboonaysiinta Heerka Ku-Meelgaarka Loo

### Ammaangaliyo

- Maamulka Biden ayaa dhawaan Heerka Ku-Meelgaarka Loo Ammaangaliyo (TPS) ugu dhawaaqay muwaadiniinta Suudaan, Yukrayan, iyo Afgaanistaan.
  - Markay ahayd Maars 2, 2022, Waaxda Amniga Dalka (DHS) ayaa ku dhawaaqday u garashada Suudaan Ku-Meelgaarka Loo Ammaangaliyo in muddo 18 bilood ah.
  - Markay ahayd Maars 3, 2022, DHS ayaa ku dhawaaqday u garashada Yukrayan heerka TPS in muddo 18 bilood ah.
  - Markay ahayd Maars 16, 2022, DHS ayaa ku dhawaaqday u garashada Afgaanistaan heerka TPS in muddo 18 bilood ah.
- Dowladda Biden ayaa dhawaan ku dhawaaqday TPS loogu talagalay muwaadiniinta Venezuela, Burma/Myanmar, iyo Haiti.
  - Shaksiyaadka ayaa dalban kara Venezuela TPS illaa 9ta Sebtembar, 2022.
  - Shaksiyaadka ayaa dalban kara Burmese TPS illaa 25ka Nofeember, 2022.
  - Shaksiyaadka ayaa codsan kara TPS ta Haitian ka ilaa 3da Febraayo, 2023
- DHS waxay kordhisay oo ay dib u qaabaysay TPS ta loogu talagalay dadka Soomaalida ilaa 17ka bisha Maars, 2023.
- DHS waxay kordhisay oo ay dib u qaabaysay TPS ta loogu talagalay dadka reer Yemen ilaa 3da bisha Maars, 2023.
- TPS ayaa loo kordhiy dadka reer Koonfurta Suudaan ilaa 3da bisha Nofeember, 2023.
- Waaxda DHS waxay si toos ah ay u fidinaysaa ansaxnimada dukumiintiyada la xiriira TPS ee ka-faa'iideystayaasha sida ay hoos timaado ama iyadoo la raacayo tilmaamaha TPS ee El Salvador, Haiti, Nicaragua, Sudan, Honduras, iyo Nepal illaa 31k Disembar, 2022, laga bilaabo taariikhda uu dhacayo hadda 4ta Oktoobar, 2021.
- DHS waxay kordhisay oo ay dib u qaabaysay TPS ta loogu talagalay dadka reer Suuriya ilaa 30ka bisha Siteembar, 2022.
- Dhammaan codsadyaasha TPS waxay hadda buuxin karaan Foomka I-821, Codsigaa Xaaladda Ilaalisan ee Ku Meel Gaarka ah, onlays at [uscis.gov/i-821](https://uscis.gov/i-821).
- Ka fiiri [uscis.gov/TPS](https://uscis.gov/TPS) si aad u hesho wararkii ugu dambeeyay.

### Ahmiyadaha cusub ee dhaqan gelinta waxay xadidaan cida ay ICE yoolka sarayso.

- Taariikhdu markay ahayd 30ka bisha Sebtembar, 2021, Waaxda Amniga Gudaha (DHS) waxay soo saartay hagitaan cusub oo ku aaddan dhaqangelinta socdaalka, oo ay ku jiraan xirida iyo haynta:  
[ice.gov/doclib/news/guidelines-civilimmigrationlaw.pdf](https://ice.gov/doclib/news/guidelines-civilimmigrationlaw.pdf)
  - Qoraalkan wuxuu si rasmi ah u dhaqan galayaa 29ka bisha Noofambar, 2021.
- Waxaad weyddiisan kartaa inuu qareenkaagu sahmiyo ka suurtagalnimada gacan-u-bannaani xeer-ilaalineed qareenka dowladda ee loo xilsaaray kiiskaaga. Haddii aadan u haysan wakiillnimo sharchiyeed kiiskaaga, waxaad weyddiisan kartaa qareenka dowladda marka la joogo dhageysigaaga haddii aad uqalanto gacan-u-bannaani xeer-ilaalineed iyo in kale. Si aad u hesho talo sharci oo aad ku ogaanayso haddii aad qareen heli karto:
  - Dadka Degen NYS: soo wac Xafiiska khadka tooska ah ee Maraykanak Cusub [1-800-566-7636](tel:1-800-566-7636)
  - Dadka Degen NYS: soo wac [311](#) oo dheh "ActionNYC" Ay magaaladu Maalgeliso, bilaash ah, iyo caawimada sharciga ah ee badbaadada ah.

### Ilaalinta loogu talagalay dhalinyarada muhaajiriinta ah ee leh xaalad da' yarta ah ee muhaajiriinta gaarka ah (SIJS)

- Markay ahayd Maars 7, 2022, maamulka Biden ayaa ku dhawaaqay siyaasado cusub oo kala caddaynaya shuruudaha uqalmitaanka SIJS, sida arrimo cusboonaysiinta xeerka ka-bixintanka da'da si loo ilaaliyo codsadyaasha 21 jirsaday markuu arrimahooda codsigu socdo. Xeerku waa tallaabo xasaasi ah oo loo qaadayo dhinaca sugidda amniga iyo xasilloonida loogu talagalay dhalinyarada muhaajiriinta ah ee lagu xadgudbay, la dayacay, dayrsanaan la galiyay, kuwaas oo qaar badan oo ka mid ah horay loo siiyay SIJS oo sugaya inay u qalmaan codsashada kaarka cagaaran oo ay helaan degganaansho rasmi ah. Xeerka kama dambaysta ah ayaa laga heli karaa halkan:  
[federalregister.gov/d/2022-04698](https://federalregister.gov/d/2022-04698)
- USCIS ayaa walibana cusboonaysiisay ujeeddooyinkooda, si ay u bixiso utixgalinta ka ilaalinta masaafurinta iyo u oggolaanshaha u fasaxyada shaqada iyada oo loo eego xaalad ka-xaalad dhalinyarada ay saamaysay isku daba tuulmidda hawasha fiisaha SIJS. Si aad u hesho Maclumaaad dheeri ah:  
[uscis.gov/newsroom/alerts/uscis-to-offer-deferred-action-for-special-immigrant-juveniles](https://uscis.gov/newsroom/alerts/uscis-to-offer-deferred-action-for-special-immigrant-juveniles)

# Waxbarashadda 1/2

## Sannad Dugsiyedka 2021–22

- Waaxda Waxbarashada Gobolka New York (NYSED) ayaa ku dhawaqaqday in imtixaannada Gobolka oo dhan ah (Regents exams) la qaadi doono Juun 2022 & Ogast 2022.
- NYSED iyo Golaha Maamulka Tacliinta (Board of Regents) ay ansixiyay ka-dhaafitaannada COVID-19 imtixaanada Gobolka gudihii Juun 2020, Ogat 2020, Janawari 2021, Juun 2021, Ogast 2021 iyo Janawari 2022. Haddii ardaygu helo ka-dhaafitaanka imtixaanka COVID-19, loogama baahna inay qaataan/dib u qaataan imtixaankaas si ay u qalin-jabiyaan. Markan la joogo, ma jiraan ka-dhaafid COVID-19 oo loo ansixiyay imtixaanada Juun 2022 ama Ogost 2022.
  - Inaad hesho faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan ka-dhaafitaannada COVID-19, eeg U-doodayaasha Carruurta “Summary of Changes to Graduation Requirements due to COVID-19” (Sookoobka Isbeddellada Shuruudaha Qalinqabinta ee ay sabab u tahay COVID-19).
  - Si aad faahfaain dheeraad uga hesho arrimaha ku saabsan Xuquuqaha Imtixaanka Gobolka oo Dhan (Regents exam), filri U doodayaasha loogu talagalay “Xuquuqaha Imtixaanka Gobolka oo Dhan”
  - Macluumaad ayaa lagu heli karaa luqado badan halkan [advocatesforchildren.org/get\\_help/guides\\_and\\_resources/transition](http://advocatesforchildren.org/get_help/guides_and_resources/transition)
- Gobolka New York ayaa qaaday xeerka af-saabka xirashada dugsiyedka, iyada markaa uu oggolaanaysa degmooyinka maxalliga ah inay go'aansadaan inay af-saabka ka dhigaan mid ikhtiyaari ah.



- Barnaamijyada Xagaaga 2022 ee Magaalada New York
  - NYC waxay u gasoo fidin mar kale barnaamijka Summer Rising oo loogu talagalay ardayda K-8 ee rabta fursadda banaamijka xagaa. Barnaamijka waxa ku jiri doona qayb tacliimeed subaxii iyo tayeynta gallinka dambe, oo ay ku jiraan safarrada dibadda, hawlaha fanka, iyo madaddaalada dibadda. Barnaamiju wuxuu socon doonaa laga bilaabo 8 subaxnimo illaa 3 gallinka dambe, iyada oo ay jirto fursad lagu dheerayn karo maalinta illaa 6 gabanimo.
- Markay tahay ardayda dugsiga sare, NYC ayaa ballarinaysa barnaamijkeeda Shaqaalaysiinta Dhallinta xagaaga, iyada oo bartilmaamsanaysa inay u fidiso shaqo-barashooyin (internships) illaa 100,000 oo reer New Yorker ah oo da'doodu tahay 14-24.
- Booqo [schools.nyc.gov/enrollment/summer](https://schools.nyc.gov/enrollment/summer) si aad u hesho macluumaad dheeraad ah. Isqoritaanka barnaamiju ayaa furmi doona Abril.

## Fursad Faneedka Xagaaga

- Dugsiga Xagaaga ee Fanka ee Gobolka New York (NYSSSA) ayaa u fidin doona wadar ahaan \$150,000 fursadaha deeqaha waxbarasho ee ardayda dugsiga sare si ay uga qayb galaan barnaamijyada fanka xagaaga ee kale ee loogu talagalay xagaaga 2022.
- Hadafka barnaamijka deeqda waxbarasho waa in kor loo qaado marin ugu helitaanka iyo sinnaanta waxbarashada fanka iyada oo la siiyo deeqo salka ku haya baahida ardayda dakhligoodu hooseeyo ee raadinaya fursadaha waxbarashada xagaaga.
- Codsiga deeqda waxbarasho ayaa qiimeyn doonta baahida lacageed oo kuma jiri doonto qayb ka mid ah hibo soo bandhigga ama tusaalaha hawlaha.
- Ardaydu waxay ka codsan karaan onlayn ilaa 1da Maajo, 2022. Macluumaad dheeraad ah ayaa laga heli karaa barta interneka NYSSSA:  
[oce.nysed.gov/nyssa](http://oce.nysed.gov/nyssa)

# Waxbarashadda <sup>2/2</sup>

## Ilaha loogu talagalay qoysaska ardayda baranaya

### Ingiriisiga

- La socdsiintu waxay muhiim u tahay hubinta in Bartayaasha Luqadda Ingiriisiga (ELLS) si wanaagsan loogu adeego. Waaxda Waxbarashada ee Gobolka New York waxay abuurtay Sharciga Xuquuqda Waalidka ee Barnaamijka Barashada Luqadda Ingiriiska kaas oo soo koobaya xuquuqda muhiimka ah ee ku saabsan helitaanka waxbarashada iyo barnaamijyada ELL -yada iyo waalidkood: [bit.ly/3EJdOTd](https://bit.ly/3EJdOTd)
  - Maclumaadka waxaa lagu soo qoray luqaddaha Carabi, Bengali, Shiine (La fududeeyay), Shiine (Asalka), Ingiriis, Faransiis, Haitian Creole, Karen, Nepali, Ruush, Isbaanish, Yukreeniyaan, iyo Urdu.
  - Waxaad wici kartaa Khadka Waalidka ELL [800-469-8224](tel:800-469-8224) haddii aad qabtid su'aalo ama walaacyo.

## Kaalmada Dhaqaale ee Kulliyada iyo Xeerka NYS

### DREAM

- Ma u baahan tahay lacag kulliyad? Talaabadaada ugu horeysa waa inaad buuxiso Codsiga Bilaashka ah ee Dawlada Dhexe ee Kaalmada Ardayda (Free Application for Federal Student Aid) (FAFSA). Hadda waa waqtigii la bilaabi lahaa: lacagta federaalka iyo dawlad-goboleedka ayaa marka hore timid, marka hore la adeego. Ka codso [studentaid.gov/FAFSA](https://studentaid.gov/FAFSA).
- Caawimo ka hel [UnderstandingFAFSA.org](https://UnderstandingFAFSA.org), mareeg cusub oo ka jawaabaya su'aalaha ugu badan ee ardayda iyo qoysaska Magaalada New York. Hagaha FAFSA ee bilaashka ah ee loogu talagalay ardayda dhigata Dugsiga Sare waxa lagu heli karaa tobantu luqadood.
- Senatoore José Peralta Sharciga Gobolka New York wuxuu ardayda aan sharciga aan haysan iyo ardayda kaleba wuxuu siinayaa inay helaan deeqaha ay NYS maamusho iyo deeqaha waxbarasho ee kaabaya qarashkooda tacliinta sare.
  - Dhammaan wixii xog ah ama sida loo codsado, booqo [hesc.ny.gov/dream](https://hesc.ny.gov/dream)

## Ilaha helitaanka kulliyadda ee loogu talagalay

### ardayda aan sharciga haysan

- Hagaha cusub ee soo-galootiga ah ee xog-ogaalka ah wuxuu siyyaa ilo iyo macluumaa ardayda dugsiga sare iyo kulliyadda ee aan diiwaan - gashanayn, labadaba DACA iyo la'aanteedba, si looga caawijo inay gaaraan go'aanno xog-ogaal ah oo ku saabsan mustaqbalkooda iyo inay helaan aaladaha ay u baahan yihiin si ay naftooda ugu doodaan: [informimmigrant.com/guides/students](https://informimmigrant.com/guides/students)
- Best Colleges ayaa dhawaan daabacay hage kuliyaadeed oo loogu talagalay DACA iyo ardayda aan shariyeysnayn ee ku saleysan cusboonaysiinta ugu dambeysay ee DACA: [bestcolleges.com/resources/undocumented-students/college-guide](https://bestcolleges.com/resources/undocumented-students/college-guide)



# Dimuqraadiyada



## Doorashooyinka Guddiga Dugsiga: 17ka Maajo, 2022

- U codee: wakiillada iyo miisaaniyadda degmadaada dugsi dhexdeeda (oo ay ku jiraan K-8, K-12, iyo nidaamyada dugsiga sare ee dhexaad).
- Doorashooyinka ayaa lagu qaban doonaa degmooyinka oo dhan marka laga reebo Buffalo, New York City, Rochester, Syracuse, iyo Yonkers.
- Waqtiga kama dambaysta ah ee isku diiwaangelinta codbixinta Doorashada Guddida Dugsiga ayaa ah 10ka Maajo, 2022.
- Soo-helaha Dugsiga ama Degmada Dugsi ayaa ah: [nces.ed.gov/ccd/schoolmap](https://nces.ed.gov/ccd/schoolmap)
- Soo hel dugsigaaga ama degmadaada ka dibna aad bartooda internetka ama wac iyaga si macluumaad dheeraad ah u hesho.

## Doorashada Koowaad: 28ka Juun, 2022

- U codee: Guddoomiyaha Gobolka, Ku-xigeenka Guddoomiyaha, Xeer Ilaaliyaha Guud, Madaxa Xashuuraha Gobolka, Aqalka Sare ee Gobolka, Shir Guddenka Gobolka, Guurtida Maraykanka, Wakiilka Aqalka Hoose ee Maraykanka.
- Waxaad ku codayn kartaa boosta ama waxaad ku codayn kartaa qof ahaan adiga goobta yimaad (horay ahaan ama maalinta doorashada).
- Wakhtiga kama dambaysta ah ee isku diiwaangelinta codbixinta doorashada koowaad waa Juun 3, 2022.

## Intro 1867 – Magaaladeena Codaynteen (Magaalada New York City)

- Golaha Magaalada New York ayaa meel mariyay xeer lagu ballarinayo xuquuqda cod bixinta ku dhowaad 900,000 degganeyaal rasmi oo sharci ah iyo kuwa leh u oggolaanshaha shaqada ee ku nool magaalada NYC. Xeerka, oo loo yaqaan Intro 1867, ayuu saxiiyay Duqa Magaalada Eric Adams markay ahayd Janawar 2022.
- Laga bilaabo 2023, dadku waxay karti u yeelan doonaan inay ka codeeyaan doorashooyinka dawlada hoose ee xafiisyada Magaalada New York (oo ay ku jiraan Golaha Magaalada, Duqa Magaalada, U doodaha Dadweynaha, Madaxa Cashuuraha Gobolka) iyo qorshayaasha codbixinta.
- Shakhsiyaadka uqalma ayaa karti u yeelan doona inay isdiichaangeliyaan si ay u codeeyaan dhammaadka 2022.
- Tani ma khusayso doorashada dowladda gobolka ama dwaladda federaalka.
- Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, booqo, [ourcityourvote.org](http://ourcityourvote.org)

## Isku diiwaangeli si aad u codayso

- Waad isku diiwaangelin kartaa inaad codayso haddii aad tahay da'da 16+, muwaaddin Maraykan iyo deggane NY ugu yaraan 30 maalmood kahor doorashada.
  - Haddii aad tahay da'da 16 ama 17 jir, hore ayaad isku diiwaangelin kartaa inaad codayso laakiin ma codayn kartid ilaa aad noqonayos da'da 18.
  - Iskuma diiwaangelin kartid inaad codayso haddii aad xabbi ugu jirto dambi lagugu xukumay ama ay xaakin maxkamad u gartay in aadan maskax ahaan karin arrintaas.
- Guddida Doorashooyinka NYS:  
[www.elections.ny.gov/VotingRegister.html](https://www.elections.ny.gov/VotingRegister.html)
- Guddida Doorashooyinka NYC:  
[vote.nyc/page/register-vote](https://vote.nyc/page/register-vote)
- Iska diiwaangeli onlayn (haddii aad haysato Ruqsada Darawalka NYS, Oggolaan ama Aqoonsi Aan Darawal ahayn): [voterreg.dmv.ny.gov/MotorVoter](https://voterreg.dmv.ny.gov/MotorVoter)
- Ku weyddiiso telefoon ahaan is diiwaangelin foom waraaq ah (oo lagu heli karo Ingiriisi ama Isbaanish): 1-800-FOR-VOTE ([1-800-367-8683](tel:1-800-367-8683))
- Ma hubtid miyaa inaad u diiwaangashan tahay inaad codayso? Ka hubi heerkaaga isdiichaangeliya codbixiyaha barta [voterlookup.elections.ny.gov](https://voterlookup.elections.ny.gov)

## Xuquuqdaada xaga cod bixinta

- Cod bixiyayaashu waxay booqan karaan MID KASTA oo Xarumaha Codaynta Hore ah gudaha wadanka halka ay degen yihiin, laga reebo Magaalada New York, halka cod bixiyayaasha loo magacaabay hal ciwaank ilaa HAL goob codaynta hore ah.
- Haddii aad rumeysan tahay cod-bixiye xaq u leh oo aad isdiichaangalisay waqtigii lagu codeyn lahaa, laakiin magacaaga aan laga helin liiska cod-bixiyayaasha, waxaad codsan kartaa warqadda ku-meel-gaarka ah ama dhaarta.
- Ma bixinaysid Aqoonsi xaga laga codaynayo xataa haddii aad tahay cod bixiyahii u horeeyay.
- Weli waad codayn kartaa haddii aad la kulmayso hoy la'aan.
- Duruufaha qaarkood, welo waxaad u qalmi kartaa inaad codayso haddii lagu helay dembi.
- Wax badan oo shuruudaha u qalmida ah:  
[nyccfb.info/nyc-votes/how-to-vote/know-your-rights](https://nyccfb.info/nyc-votes/how-to-vote/know-your-rights)
- Qaar ka mid ah shaqaalaha gobolka New York State ayaa u qalma inay helaan illaa laba saacadood lacagta shaqada lagu siiyo si ay u codeeyaan. Fiiri bal inaad uqalanto: [www.elections.ny.gov/NYSBOE/elections/TimeOffToVoteFAQ.pdf](https://www.elections.ny.gov/NYSBOE/elections/TimeOffToVoteFAQ.pdf)

# Dhaqaalaha



## Xaraynta cashuurahaaga gudah 2022

- Iyada oo laga falcelinyao safmarenka COVID-19 iyo saamaynta maaliyadeed ee ka dhalatay, Koongarasku waxa uu ballaariyey dheefaha cashuuraha oo kordhin kara qaddarka lacagta aad ku hesho cashuur celintaada. Iyada oo ay dhici karto inaad heshay xoogaa lacag-bixinno Naqidda qaddimaad ah intii lagu jiray 2021, oo ay ku jirto Ugu Naqidda Ilmaha ee Cashuurta, waxa laga yaabaa inaad u qalanto inaad dheefo kale aad marin u hesho markaad xareyso canshuur celintaada 2022. Ka Fiiri hagaha oo dhan halkan [www.consumerfinance.gov/coronavirus/managing-your-finances/guide-filing-taxes-2022](http://www.consumerfinance.gov/coronavirus/managing-your-finances/guide-filing-taxes-2022)
- U Naqidda Cashuurta Ilmaha
  - Sannadkii 2021, dheeftani wey korodhay, waxaana qayb ka mid ah naqidda ayaa loogu diray qoysas badan ahaan lacag-bixinno u hormaris ah sannadka oo dhan. Markay tahay 2021 u naqidda cashuurta ilmaha ( CTC ) ayaa si buuxda loo soo celin karaa, taas oo micnaheedu yahay haddii aan wax cashuur ah aan lagugu lahayn waxaad heli doontaa qaddarka buuxa ee aad ugu qalanto qayb ka mid ahaanta canhuur celintaada.
  - Waxaa laga yaabaa inaad uqalanto inaad hesho illaa \$3,600 ilmo kasta oo da'diisu tahay 0 illaa 5 iyo \$3,000 ilmo kasta oo da'diisu tahay 6 illaa 17.
- Naqidda Ilmaha iyo Daryeelka Ku-tiirsanaanta (CDCC)
  - Makray ahayd 2021, haddii aad lacag ku bixisay kharashyada daryeelka carruurta markaad shaqaynayo ama aad si firfircooni raadinayssay shaqo, qayb ka sii badan oo ka mid ah kharashyadaada daryeelka ilmaha ayaa la soo celin karaa.
  - Tusaale ahaan, qoyska haysta carruur ka da'yar 13 jir ama kuwa kale ee ku tiirsanayaasha u qalma ah ayaa dhici karta inay helaan boqolkiiiba 50 (iyada oo laga soo kordhiyay 35%) kharashkooda daryeelka ilmaha 2021, illa qaddar go'an.

- Naqidda cashuurta dakhliga la kasbaday (EITC)
  - Markay tahay 2021, lacagta ugu badan ee EITC ayaa korodhay, oo dad ka sii badan ayaa u qalma inay codsadaan naqidda. Markay tahay sannad cashuureedka 2021, waxa kale oo aad isticmaali kartaa dakhligaagii 2019—haddii uu ka sarreeyo dakhligaaga 2021 laakiin ka yar dakhliga ugu badan ee naqidda cashuurta la kasbaday (EITC)—si aad u xisaabiso dheeftaada.
  - Xusuusin: Si aad u sheegato naqidda EITC labada qof ee xeraynaya cashuur celinta iyo dhammaan carruurta ku tiirsan waa inay haystaan lambar SSN oo sax ah.
- 2021 Biximaha Saamaynta Dhaqaaleed
  - Dad badan oo Maraykan ah ayaa helay Lacag bixinta Saamaynta Dhaqaalaha (EIP) oo ah \$1,400 sannadkii 2021. Haddii aadan helin saamayntii dhaqaalaha ee EIPgii ugu dambeeyay, waxaad ku sheegan kartaa markaad xareyso cashuur celintaada 2021.
  - Xusuusin: Dadka haysta lambarka gaarka ee cashuurta (ITIN) uma qalmaan EIP, laakiin waxa loo sheegan karraa dhammaan xubnaha qoyska ama kuwa ku tiirsan ee haysta lambarka SSN oo sax ah.
- Lacag Bixinta Gargaarka Kirada Kediska Ah (ERA).
  - Haddii aad heshay biximaha ERA si aad u qanciso kirada, yutiilitida, ama kharashyada tamarta guriga sannadkii 2021 lacagahan looma tixgalinayo dakhli la cashuuri karo oo uma baahna in lagu caddeeyo cashuur celintaada.
- Waxaad ka heli kartaa caawimada diyaarinta cashuurta bilaashka ah ee mutadawiciin ay IRS-xaqiijisay oo jooga goobta Caawimada Cashuuraha Dakhliga Tabarucayaasha (Volunteer Income Tax Assistance ama VIT) ama Kala La-Talinta Arrimaha Cashuurta Dadka Waayeelka (Tax Counseling for the Elderly ama TCE) haddii:
  - Dakhligaagu yahay \$58,000 ama u ka yaryahay
  - Aad tahay 60 sano jir ama intii ka wayn?
  - Aad qabto naafanimo ama aad ku hadasho Ingiriisi xaddidan
  - Ka hel taageero onlayn VITA ooo lacag la'aan ah halkan [getyourrefund.org](http://getyourrefund.org)
  - Ka hel goobta VITA ama TCE ee aad qof ahaan meesha tagi karto ee kuugu dhow halakan [irs.treasury.gov/freetaxprep](http://irs.treasury.gov/freetaxprep)
- Muddada kama dambaysta lagu xareynayo cashuur celintaada ama codsashada u kordhinta muddada ayaa ah Abril 18, 2022.
- Iska ilaali khayaanooyinka! IRS-ta (iyo wakaaladaaha kale ee dawladd) ayaan waligood kuu soo diri doonin waligood, tekest (text), iimayl ama kaala soo xiriiri doonin warbaahinta bulshada iyagoo ku wayddisanaya macluumaadkaaga shakhsiyeed ama maaliyadeed.

# Garo Xuquuqdaada

Xubnaha bulshada iyo xulafada waa inay ka feejignaadaan xuquuqdooda mar kasta oo ay la macaamilayaan Socdaalka iyo Dhaqangelinta Kastam (ICE), Ilaalada Xuduudaha, ama sharci fulinta kale.

## Haddii ay ku joojiyaan laanta socdaalka ama sharci fulinta kale ay ku joojiyaan, xusuusnow:

- Isdeji. Ha ka ordin. Ha iska caabin ama ha hor istaagin sarkaalka.
- Been ha sheegin, hana tusin dukumeenti been abuur ah.
- Waxaad xaq u leedahay in aad diido. Wax kasta oo aad tiraahdo waa laguu adeegsan karaa.
- Haddii wakiilku ku weydiyo inay ku baari karaan adiga ama alaabtaada, waxaad xaq u leedahay inaad tiraahdo maya.
  - Si kastaba ha noqotee, jir ahaan iskama caabin kartid.
  - Boolisku waxa laga yaabaa inay jirkaaga baaraan haddii ay hub ka shakiyan.
- Haddii aadan ahayn muwaadin Maraykan ah oo wakiilka socdaalka uu ku codsado sharcigaaga socdaalka, waa inaad tustaa haddii aad wadato.
- Haddii lagu joojiyo, lagu xiro, ama lagu dhibaateeyo sharci fulinta, isku day inaad hesho wakiilka(yada) magaca, lambarka, iyo maclumaad kasta oo lagu aqoonsan karo.
- Adiga ama qof kale oo bulshada ka tirsan sharci fuliyaha waxa aad qaadi kartaan fiidiyow ama cod duube ah waraysiga isdhexgalkiisa. Sidoo kale waxaad qori kartaa wixii dhacay ka dib markay baxaan.
- Waa sharci darro in saraakiisha sharci fulinta ay sameeyaan joogsi kasta, baaritaan, xarig, ama masaafurinta ku saleysan midabkaaga, asalkaaga, diintaada, jinsigaaga, ama qowmiyaddaada.

**Waxaad u sheegi kartaa isdhexgalka wakiilada federaalka Mashruuca Difaaca Soogalootiga (Immigrant Defense Project (IDP)).**  
**IDP sidoo kale waxay siisaa maclumaad sharci ah iyo u gudbinta muhaajiriinta la xiray, tigidhada laga jaray, ama lagu helay dambi. Wac 212-725-6422 ama iimayl u dir info@immdefense.org.**



## Goobaha Gaarka ah

- Gurigaaga iyo "goobaha gaarka ah" (sida meelaha shaqaalah-kaliya loogu talagalay ee goobta shaqada) waxay wataan ilaalin gaar ah oo goobaha dadweynuhu aanay samayn. Saraakiishu waxay geli karaan oo keliya meelaha gaarka ah haddii ay oggolaanshahaaga helaan ama ay ku tusaan waaran garsoor (uu saxeexay garsoore).

## Goobaha la Ilaaliyo

- 27ka bisha Oktoobar, 2021, Waaxda Amniga Gudaha (Department of Homeland Security) waxay soo saartay siyaasad cusub oo xaddidaysa tallaaboooyinka dhaqangelinta ICE iyo CBP gudaha ama ku dhow "meelaha la ilaaliyo."
- Tusaalooyinka meelaha la ilaaliyo waxaa ka mid ah, balse kuma koobna oo kaliya: dugsiyada iyo xarumaha kale ee waxbarashada ama munaasabada, xarumaha daryeelka caafimaadka, goobaha cibaadada, meelaha ay carruurtu isugu yimaadaan, goobaha adeegyada bulshada, xarumaha musiibada ama xaaladaha degdegga ah, xafladaha sida aroosyada iyo aaska, iyo bannaanbaxyada dadweynaha sida dhoolatusyada iyo isu soo baxyada.
- Gobolka New York, wakiilada socdaalka federaalku kama soo xiri karaan dadka, ama aadaya ama ka baxaya, gobolka, magaalada, iyo guryaha maxkamadaha dawlada hoose, amar maxkamadeed la'aanteed.

## Ka digtoonow khiyaanada socdaalka

- Waa inaad kaliya la hadashaa qareen ama Waaxda Caddaaladda (DOJ) wakiil la aqoonsan yahay si uu talo sharci ugu helo xaaladdaada.
- Weligaa caawimaad ha ka qaadan socdaal "notario", wakiilka socdaalka, diyaariyaha cashuuraha, foomamka diyaariya, ama nootaayo. Gudaha Maraykanka, "notario" qareen ma aha!

**Haddii aad u baahan tahay in lagaa caawiyo kiiskaaga ama aad qabto wax su'aalo ah ee socdaalka guud, wac khadka tooska ah ee Xafiiska Maraykanka Cusub 1-800-566-7636.**

# Dembiyada

## Nacaybka ah

**Bilahii u dambeeyay, waxaa jiray warbixino sii kordhayay ee demiyada nacaybka ku lidka ah xubnaha bulshadda muhaajirka.**

### **Waa maxay dembiga nacaybku?**

- Dembiga nacaybka waa demb ay dhiirigeliso eexdu.
- Qofku waxa uu galaa dembiga nacaybka marka mid ka mid ah dembiyada ka caddeeyay la galo ee beegsanaya dhibanaha sababtoo ah fikirka ama rumayn ku saabsan isirka, midabka, asalka qaranka, tafiirta, sinjiga, diinta, ku dhaqanka diinta, da'da, naafanimada ama qaabka galma, ama marka falkan loo galo iyaddoo ay keentay nooca fikirka la qaba ama waxa laga aaminsan yahay qofka.
- Badhasaab Cuomo waxa uu sameeyay Kooxda hawlgalka Degdega ah ee Dembiyada Nacaynka si ay ula dagaalamaan warbixinaha kordhaya ee eexda oo ay dhiirigeliso hanjabaado, dhibaatayn iyo rabshsad ka dhacda Gobolka New York oo dhan.
- Marka laga warbixiyo dembiga nacaybka, dhammaan macluumaadka ku saabsan waayo aragnimadaada, aqoonsiga, iyo waxa kale waxay ahaadaan qarsoodi.

**Haddii aad aragto shay ama aad tahay dhibaha dembiga nacaybka, uga warbixi booliska oo soowac Qaybta Xuquuqda Aadamaha ee NYS. Soo wac 1-888-392-3644 ama Fariin qoraal ah ugu dir "HATE" lambarka 81336.**

**Haddii adiga ama qof aad garanayso uu ahaa dhibanah dembiga, Xafiiska NYS ee Adeegyada Dhibanaha waxa uu awoodi karaa inuu kaa caawiyo biillashada caafimaadka iyo la talinta kharashyada, aaska iyo kharashyada geerida aaskeeda, mushaharka lumay, iyo nooc yada kale ee caawimada. Soo wac 1-800-247-8035 ama booqo ovs.ny.gov.**


### **Dadka degen NYC iyo wadamada ku xeeran**

Gudaha NYC:

- Qareenka dad waynaha
  - 212-669-7250
- Qareenka Degmadda Manhatan
  - 212-335-3100
  - manhattanda.org/victim-resources/hate-crimes
- Qareenka Degmadda Brooklyn
  - 718-250-4949
  - brooklynda.org/hate-crimes-bureau
- Qareenka Degmadda Queens
  - 718-286-6000
- Guddida Xuquuqda Aadamaha NYC
  - 718-722-3131
  - nyc.gov/cchr
- Aga Badbaada ah ee Caawimada Dhibanaha
  - 1-866-689-4357

Ka baxsan NYC:

- Qareenka Degmadda Nassau
  - 526-571-3505
  - nassauda.org
- Qareenka Degmadda Nassau, Xafiiska Arrimaha Muhaajirka
  - 516-571-7756
- Hawl fuliha Degmadda Nassau Laura Curran
  - 516-571-3131
- Qareenka Degmadda Suffolk
  - 631-853-4161
  - suffolkcountyny.gov/da
- Degmadda Suffolka Waaxda Booliska, Qaybta Dembiyada Nacaybka
  - 631-852-6323
- Degmadda Suffolk, Waaxda Arrimaha Dadka laga tirada badan yahay
  - 631-853-4738
- Degmadda Westchester, Guddida Xuquuqda Aadamaha
  - 914-995-7710
  - humanrights.westchestergov.com



# Ilaha NYS



## Xafiiska NYS ee Maraykanka Cusub

- Haddii adiga ama qof aad garanaysaa uu u baahan yahay caawimada sharciga soo wac khadka tooska ah [1-800-566-7636](tel:1-800-566-7636). Dhammaan macluumaadka wicitaanku waa qarsoodi. Caawimada waxaa lagu heli karaa 200+ luqaddoo.

## Waaxda Caafimamadka NYS

- Macluumaadka u dambeeyaa ee safmarka COVID-19, soo wac khadka tooska ah [1-888-364-3065](tel:1-888-364-3065) ama booqo [ny.gov/coronavirus](http://ny.gov/coronavirus).
- Hel xaqiyooyinka tallaalka COVID-19 gudaha New Yorka bogga [ny.gov/vaccine](http://ny.gov/vaccine).
- Codso daboolida caafimamadka: soo wac [1-855-355-5777](tel:1-855-355-5777) ama booqo [nystateofhealth.ny.gov](http://nystateofhealth.ny.gov).

## Xafiiska Caafimaadka Maskaxda NYS

- FSu'aalaha dheeraadka ah ee ku saabsan adeegyada caafimaadka maskaxda ama si aad u hesho adeeg bixiyaha adeega caafimaadka maskaxda, soo wac [1-800-597-8481](tel:1-800-597-8481) ama [omh.ny.gov](http://omh.ny.gov).
- Haddii aad la kullanto walbahaar uu sababo gurmadii korona fayraska, soo wac [1-844-863-9314](tel:1-844-863-9314).
- Laynka Qaranka tooska ah ee Ka hortagga Isdilada: Haddii noloshaada ama qof kale noloshiisu ay khatar wayn ku sugar tahay, soo wac [911](tel:911). Haddii aad ku jirto dhib oo aad u baahan tahay caawimo degdeg ah, soo wac [1-800-273-8255](tel:1-800-273-8255) ama fariin Qoraal ah ugu soo dir "GOT5" ilaa [741-741](tel:741-741).
- Rabashada Guriga: haddii adiga ama qof kale uu xidhiidh la leeyaha uu ku maamulayo qof kale hadal, qaab dagaalansan, ama xad gudub galmo, ama farsamooyin kale, soo wac NYS Domestic Violence Hotline lambarka [1-800-942-6906](tel:1-800-942-6906).

## Waaxda Shaqada NYS

- Waaxda Shaqada NYS waxaa ka go'an ilaalinta iyo sare u qaadida badbaada shaqaalahi iyo caafimamadka, mushahrka, iyo xaaladaha shaqada.
- Macluumaadka dheeraadka ah ee ku saabsan mushaharka iyo sharciyada saaada, caafimaadka iyo badbaadada goobta shaqada, ama ku soo xaree cabasho, soo wac [1-888-469-7365](tel:1-888-469-7365) ama booqo [dol.ny.gov/safety-and-health](http://dol.ny.gov/safety-and-health)
- Wixii ah caawimada Caymiska Shaqo la'aanta, wac [1-888-209-8124](tel:1-888-209-8124) ama booqo [dol.ny.gov/unemployment/unemployment-insurance-assistance](http://dol.ny.gov/unemployment/unemployment-insurance-assistance).

## Qayba Xuquuqda Aadamaha NYS

- Sharciga Xuquuqda Aadamaha New York waxa uu mamnuucaa takoorka dhinacyada sida shaqada, guriyaynta, amaahda, waxbarashadda, iyo meelaha hoyga dad waynaha, oo ku salaysan da'da, isirka, asalka qaranka, sinjiga, qaabka galma, aqoonsiga sinjiga ama muuqaalka, heerka guurka, heerka ciidaanka, iyo dabaqadaha kale.
- Haddii aad dareemayso in lagu takoroay, ku soo xaree cabashada [1-888-392-3644](tel:1-888-392-3644) ama booqo [dhr.ny.gov](http://dhr.ny.gov).

## Ilaha COVID-19 Magaalada New York

- Dadka degen NYC ee raadinaya adeega adeeg bixiyayaasha ama ilaha kale waxay ka heli karaan diiwaanada hoose:
  - Waxbarshadda: [nyic.org/covid-education-resources](http://nyic.org/covid-education-resources)
  - Shaqada: [nyic.org/covid-employment-resources](http://nyic.org/covid-employment-resources)
  - Dhaqaalahi: [nyic.org/covid-financial-resources](http://nyic.org/covid-financial-resources)
  - Cuntadda: [nyic.org/covid-food-resources](http://nyic.org/covid-food-resources)
  - Daryeelka Caafimaadka: [nyic.org/covid-healthcare-resources](http://nyic.org/covid-healthcare-resources)
  - Ganacsiga yar: [nyic.org/covid-small-business-resources](http://nyic.org/covid-small-business-resources)

Haddii aad qabto su'aalo ama faallooyin ku  
saabsan agabkan ama macluumaadka ku jira,  
fadlan la xidhiidh:

Bryan Lee  
blee@nyic.org

Dukumentiga qatka internetka ka fiiri ama luqado  
kale iyadoo lagu qoray, boooqo [nyic.org/KYR](http://nyic.org/KYR) ama  
calaaamaddan iskaangaree:



Isbahaysiga Laanta Socdaalka New York (NYIC)  
waa xeerka dalaayad iyo urur u doodis ah ah  
oo metela in kabadan 200 oo muhaajiriin ah  
iyo kooxaha xuquuqda qaxootiga dhammaan  
New York.

Waxaa noo muuqda Gobolka New Yorka oo ka  
xoog badan sidii hor esababtoo ah dhammaan  
dadka waa la soo dhawaynayaa, waxaa loola  
dhaqmaa si xaq ah, oo waxaa la siiyaa fursada  
ay ku raacdeeyaan riyooyinkooda. Hiigsigayagu  
waa inaan midayno muhaajiriinta, xubnaha, iyo  
gaanshaan buurta markaad dhammaan dadka  
reer New York way samaadaan.



#### New York Immigration Coalition

131 W 33rd St, Ste 610  
New York, NY 10001  
212 627 2227  
[nyic.org](http://nyic.org)

Hagaha ilahan  
waxaa taageeray:

